

# Xubin noqo!

## Urrrada ka jira dalka Swidhan way tiro iyo firfircooni badan yihiin

Sidee bay taasi ku dhacday? Maxaa sabab u ah in dadku xubin ka noqdaan ururrada? Sidee bay ururradu u shaqeeyaan? Waxaan hoos kaga jawaabaynaa suaalaha kor ku xusan.

## Urrradu waa goob kulan!

Ka qaybgalka ururrada way u furan tahay qof walba. Taasi waxay tahay in dadkoo dhan xaq u leeyihiin inay ka mid noqdaan ururrada ku hawlan arrimaha ay daneynayaan. Isla marka waxaa suura gelaya kulanka dadka isku danta ama isku dooqa ah.

## Jiritaanka urrradu waa iskaa-wax-u qabso

Taas macneheedu waxay tahay in xubnaha – yar iyo wenba – ay ka hawl galaan ururka waqtiga ay firaqada yihiin mushaar la’aan.

## Ka qayb qaadashada waalidka aad bay muhiim u tahay

Si ay meelmar u noqoto hawlaha loo qabanayo carruurta iyo dhallinyarada waxaa lama huraan ah ka qayb qaadashada waalidiinta nolosha iyo hawlaha ururrada. Kaalinta waalidka waxay ahaan kartaa inay mararka qaarkood u raacaan ubadka ciyaaraha sida tan barafka, tan dabbaalashada ama tan duur u bixidda. Kaalintaasi aad bay muhiim ururrada ugu tahay, taasoo xubnuhu mushaar la’aan ku hawlgalaan waqtigay firaqada yihiin.

## Horjooge iyo tababare niyad iyo xiise hawsha u haya

Hawlaha la xiriira fardafuulidda, shax ciyaaridda ama dhaqdhaqaaqa ka socda xeryaha waxaa mar walba ka dambeya horjogeyaal iyo tababarayaal dhallinyarada goor walba garaab taagan. Waxay hureen waqtigooda

si ay u meel- mariyaan xilka iyo masuuliyada ay dhabarka u dhigteen. Taasi waxay tusaale lagu daydo u noqon dhallinyarada Isla markaasna waxay yihiin laf dhabarka ururka.

## Nolosha ururka waxay ku saleysan tahay xubnihiisa

Firfircoonida iyo hawl-karnimada xubnaha ururka waa halbowlaha ururka. Dhaqaalaha ururka ka soo gala xubnihiisa waxay tahay mid aad muhiim u ah maadaama ay saldhig u tahay dhaqaalaha urururka. Mararka qaarkood ururradu waxay kaalmo ka heli karaan degmoyinka (komuunnada) iyo heyadaha kale. Dhaqaalaha sidaas ururka ku soo gala waxaa lagu bixiyaa kirada iyo qalabka.

## Xubnahu waxay ka mid yihiin inta goaanka leh

Urrrada waxay ku dhisan yihiin hab "demokratig" ah. Taas macneheedu waxay tahay in xibin kastaa ay ka qayb qaadan karto doodaha iyo goaammada saameynaya hawlaha ururka. Sannadkiiba hal mar ayaa la qabtaa shir-weyanaha ururka oo lagu qiimeynayo hawlaha sannadkii hore; isla markaana waxaa la goaaminayaa hawlaha iyo dhaqaala ururka. Waxaa kaloo shirkaas lagu dooranayaa guddiga uruka maamulaya ilaa shir-weynaha sannadka dambe. Guddiga ururka waxay kaloo ilaalinayaan in dhammaan xubnaha ururka ka tirsan u hoggansanaadaan xeerka ururka u degsan. Xeerku waa nidaam qoran oo tilmaamaya hawlaha iyo ulajeedoyinka ururka oo la oran karo sharciga ururka.

## Urrrada iskaa wax u qabso ee Iswiidhan ka dhisan

Urrrada ka dhisan Iswiidhan qaarkood waxaa la aasaasay boqol sano ka hor iyo intii ka dambeysay. Waxaa ugu tira iyo dhaq-dhaqaaq badan ururrada ciyaaraha kala duwan. Waxaa kalo jira ururrada dhaqanka oo ku hawlan riwaayadaha, muusikada iyo qoob kaciyarada. Intaas waxaa dheer ururrada hawa-geddiska, kuwa diimeed, kuwa xuquuqda dadka kuwa xuquuqda carruurta iyo kuwa difaaca degaanka.